Oslo

# Ku soo dhawoow Dugsiyada Oslo



# Waannu ku sugaynaa!



**Haddii aannu nahay Dugsiyada Oslo waxannu sugaynaa in aanu ilmahaaga ku soo dhaweyno iskuulka marka la gaadho deyrta.**

Maalinta ugu horreysa iskuulku waxay maalin weyn u tahay qoyska. Qaar badan ayaa farxad ku sugaya maalintaas, halka kuwo kale ay in yar ka cabsadaan. Laakiin si kastaba waxaad ogaataa in aannu ku dedaali doonno in ilmahaagu helo bilow iskuul oo wacan.

Waxa la rabaa in carruurta oo dhan ay ammaan iyo soo dhaweyn kala kulmaan iskuulka. Annaga oo ah shaqaalaha iyo idinka oo ah waalidka ayaa ka wadashaqayn doona in ilmuhu helo bilow wacan kuna qanco iskuulka.

Waxa la rabaa in macallimiintu ay ilmahaaga u qaabilaan si tixgelinaysa wixii uu hore u yaqaanay. Waa in aannu dhiirrigelinno oo jeclaysiinno waxbarashada, islamarkaana waa in aannu niyad-gelinno oo dhiirrigelinno ardayda. Shaqadayadu waa sidii arday kasta looga caawin lahaa in uu tiigsado meel ka sii yara sarraysa halka uu joogo.



Waxannu hadda sugaynaa in aannu baranno ilmahaaga iyo adigaba.

## Bilow iskuul oo wacan!

Mahadsanidiin
Marte Gerhardsen, agaasimaha Dugsiyada Oslo



# Carruurtu si kala duwan ayay wax u baratAA.

Carruurtu waxa lagu yaqaan rabitaan wax ogaansho, kedisnimo iyo in ay jecel yihiin u kuurgalka aduunka. Waa wax aannu jecel nahay.

Macallinku si wacan ayuu u bartaa arday kasta, waxa uu yaqaanno ardaygu, waxa uu xiiseeyo iyo sida ugu wacan ee uu wax u baran karo.

Waxa jira qaabab badan oo casharka loo bixiyo – in fasalka oo dhan lala joogo, in laga mid ahaado koox yar oo dhex joogta ama ka baxsan fasalka, in keli lala joogo macallinka ama in safar loo raaco dhammaan fasallada isku heerka la yahay.

Ardaydu fasalka way ka wada tirsan yihiin, inkastoo mid walba wax loo baro si isaga ku habboon.

# Maxay baranayaan oo sidee wax u baranayaan ardaydu?


Waxa la filayaa in aad qabto su'aalo badan. Si aad u hesho jawaababa qaar ka mid ah su'aalahaaga, iyo si loo dareemo in iskuulku yahay meel ammaan ah oo wacan oo la joogi karo, waxa iskuulku la xidhiidhi doonaa dhammaan carruurta iyo waalidka intaan la gaadhin xagaaga.

Ilmahaagu waxa uu waayo-aragnimo iyo aqoon badan kala imanaya guriga iyo xannaanada carruureed ba. Waxa la rabaa in iskuulku uu sii ambaqaado waxa ilmuhu hore u og yahay iyo waxa uu yaqaanno.

Sannad-dugsiyeedyada hore waxa ilmahaagu baran doonaa qoridda, akhrinta iyo xisaabta. Waxa kale oo ilmuhu baranayaa wadashaqaynta, is dhegaysiga, sheegista fikradahiisa iyo aragtidiisa iyo in uu noqdo saaxiib-fasalleed wacan.

Manhajyadu waa dokumentiyo sharraxaya waxa ardayda laga rabo inay bartaan. Waa isku mid waddanka oo dhan, waxaanay ku jiraan bogga internetka ee Agaasinka Waxbarashada www.udir.no

# Ka hor xilliga bilaabidda iskuulka waxa wacan in aad arrimahan ku samaysaan guriga



- wax badan u akhridaan ilmaha
- ka sheekaysataan macnaha ereyada
- ku ciyaartaan codadka luuqaddu leedahay
- wada ciyaartaan ciyaar, wax tirisaan iyo in qofku markiisa sugo
- tababbar ku saabsan xidhashada dharka

# ISKUUL




**Ka sheekaysta waxa sawirka idiinka muuqda!**

Maxay carruurtu samaynayaan?
Brøle waa uu dhuuntay sawirkan – ma soo heli kartaa isaga?
Sidee is leedahay qolka fasalku waa u eg yahay?
Raadi codka S-da! Imisa erey ayaad heshay? Ma heli kartaa ereyo isku qaafiyad ah?
Dhowr xaraf ayaa sawirka ka muuqda– ma laga yaabaa inaad qaarkood garato?
Ma heli kartaa dhammaan kubadaha buluugga ah ee sawirka ka muuqda? Kuwee ayaa u badan, ma ubaxyada basaliga ah mise kuwa huruudda ah?
Qaabab nooce ah ayaad aragtaa? (saddex-geesyo, afar-geesyo iyo goobooyin)


Sara
ALI

# Dugsiga firfircoonida (AKS)


AKS waa adeeg iskuulku bixiyo oo carruurta loogu talo galay ka hor iyo kaddib saacadaha iskuulka. AKS waxa la furayaa 1. Ogosto.

Dhammaan carruurta fasallada koowaad waxay AKS ka helayaan boos aan buuxin oo bilaash ah. Xasuuso in aad codsato boos inkastoo uu bilaash yahay. Codsiga AKS ee ilmahaaga waxaad ka soo diri kartaa bogga internetka ee iskuulka. Waxa kale oo aad halkaas ka akhrisan kartaa waxyaalaha ka dhacaya AKS-ka iskuulka ilmahaaga.

AKS waa meel laga helo horumar iyo madadaalo!







# Xuquuqda iyo waajibaadka

- Dhammaan carrruurta deggan Norway waxay xaq u leeyihiin kuna waajib ah inay helaan waxbarashada dugsiga hoose/dhexe.
- Adiga ayaa waalid ahaan ka masuul ah in ilmahaagu helo waxbarasho.
- Ardaydu waa in ay iskuulka aadaan 190 maalmood sannad-dugsiyeed kasta.
- Maalmaha iskuulka iyo maalmaha fasaxu waa isku mid iskuullada Oslo oo dhan.
- Waxa la rabaa in ardaygu joogo iskuulka, oo caadi ahaan lama siiyo fasax si uu tusaale ahaan u aado safar. Waad codsan kartaa in la siiyo fasax, waxaana go'aanka leh maamulaha iskuulka.
- Qaar ka mid ah ardaydu waxay u baahan yihiin caawimo dheeraad ah. Markaas oo kale waxay xaq u lahaan karaan in si gaar ah wax loo baro.

# Ardayda leh af hooyo oo kale

Haddii ilmahaagu leeyahay af hooyo oo aan ahayn noorweyji ama af-saami, waxa ilmaha la siin karaa casharro dheeraad ah oo af-noorweyji ama afkiisa hooyo ah. Casharrada dheeraadka ah waa saddex nooc.

- Barid af-noorweyji oo gaar ah waa casharro la xoojiyey oo looguna talo galay ilmaha oo af-noorweyjiga ah.
- Cashar-bixin labo luuqadood ah waa maaddooyinka oo ardayga loogu dhigayo af-noorweyjiga iyo afkiisa hooyo.
- Baridda afka hooyo waa ardayga oo la siinayo casharro afkiisa hooyo ah.

# Haddii aad ka soo jeeddaan Saamiga

Haddii idinka ama ilmahiinnu aad ka soo jeeddaan saamiga, waxa ilmuhu xaq u leeyahay in la baro ama wax lagu baro saamiga.

Casharrada lagu dhigo af-saamiga waxa bixiya iskuulka Nedre Bekkelaget ama waxa loo bixiyaa qaab fogaan-ka-barasho ah. Ardaygu wuxu helayaa gaadiid geeya oo ka keena iskuulka. Haddii ugu yaraan toban arday oo ka tirsan Dugsiyada Oslo ay rabaan in wax lagu baro af-saami, waa in maamulka Dugsiyada Oslo uu siiyo fursad noocaas ah.

www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/sprakopplaring/undervisning-i-samisk



# Maamulka iyo shaqaalaha iskuulka

Maamulaha iskuulka ayaa ka masuul ah iskuulka iyo AKS. Inta badan maamulaha waxa uu marka laga reebo ku-xigeenkiisa uu leeyahay hal ama dhowr kormeere iskuul, macallinka arrimaha bulshada iyo maamule AKS.

Fasal kasta waxa ay leeyihiin hal macallin xidhiidhiye ah. Fasal ama koox kasta waxay leeyihiin macallimiin iyo kaaliyeyaal kale.

# Ku saabsan Dugsiyada Oslo

Dugsiyada Oslo waa qayb ka mid ah degmada Oslo. Taas oo macnaheedu yahay in iskuulku bilaash u yahay cid kasta oo Oslo deggan.

Waxannu nahay in ka badan 17 000 shaqaale waxaana aannu haynaa in ka badan 91 000 arday iyo layli.

www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning






Degmada Oslo
Wakaaladda Waxbarashada
Dugsiyada Oslo
2024

Naqshad: Janne Dahl
Foto: Heidi M. Skjebstad iyo Mark Haldane
Sawirrada: Maria Grande Aakermann
Brøle-illustrasjoner: Barbro Barosen, Miksmaster